

## Tuubooyinka baaritaanka mindhicirada (Ileoscopy)

### Waa maxay Eegitaanka Mindhicirka Yar?

Tuubooyinka baaritaanka mindhicirada waa baaritaanka qeybta hoose ee mindhicirada yar. Baaritaankani ayaa waxaa loo isticmaalaa in lagu eega ilaha dhiiga ee mindhicirada.

### Sideen iskugu diyaariyaa baaritaankan?

- Diyaarso darawal iyo qof kula jooga maalintii. Laguuma ogolaan doono inaad gaari kaxeeyso haddii aad qaadata daawada suuxdinta.
- Dhamaan dahabka waa in guriga looga soo tago.
- Xaqiiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay kahor maalinta Qaliinka.
- Qaar kamid ah daawada aad qaadata waxaa laga yaabaa in loo baahdo in la joojiyo oo wax looga badelo si kumeel gaar ah. Waa inaad kala hadasho dhammaan daawooyinka dhiiga khafiifiya, insuliinta, ama daawooyinka cudurka sonkorta dhakhtarka kuu qora ugu yaraan 2 asbuuc kahor pH Qaliinka Dhuunta. Ha joojin qaadashada daawooyinka adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- Xaqiiji in aad raacdo tilmaamaha la xiriira cuntada iyo tilmaamaha u diyaar garowga saxarada ee uu dhakhtarku ku siiyey

### Waa maxay waxyeelada ka dhalan karta ee suurtagalka ah?

- Waxyeelooyinka aan habooneyn ee laga dhaxlo kabuubyada.
- Dhiig bax.
- Jiixdin ku timaada gidaarka mindhicirka Yar ? .
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan waydii dhakhtarkaaga.

### Maxay tahay inaan fisho kahor Baaritaanka?

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharaxi doonaa khataraha iyo faa'idooyinka laga dhaxlo baaritaankaan.
- Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaansho oo la xariira baaritaanka .
- Daawo yar ee laga qaato waxaa la gelin doonaa xididka si daawo loo siiyo inta lagu jiro baaritaanka.
- Waa la bixin doonaa qalabyada ilkaha iyo ookiyaalayaasha kahor qaliinka.
- Xaqiiji in dhakhtarkaagu oggaado haddii aad uur leedahay kahor maalinta Qaliinka.

### Maxay tahay inaan fisho inta lagu jiro Baaritaanka?

- Waxaad u seexan doontaa dhabarka.
- Tuubada ayaa lagalin doona caloosha iyo mindhicirada yar.
- Ogsajiinta ayaa la siin doonaa inta lagu jiro baaritaanka.
- Waxaa lala socon doonaa heerarka dhiig karkaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta inta baaritaanku socdo.
- Dhakhtarkaagu wuxuu dooran karaa inuu soo gooyo unug yar oo baaritaan lagu sameeyo (unug yar oo kamid ah xiidmaha) inta baaritaanku socdo. Soo jarida unug yar oo mindhicirka kamid ah iyo soo bixinta burooyinka yaryar wax xanuun ah ma sababi doonaan.
- Haddii cidhiidhi la helo, dhakhtarkaagu waxa laga yaabaa inuu go'aansado inuu furo (fur) cidhiidhiga.

### Maxaan filan karaa kadib Baaritaanka?

- Waxaa lala socon doonaa heerarka cadaadiska dhiigaaga, wadno garaacaaga iyo ogsijiinta inta aad joogto aagga soo kabashada.
- Qoyskaaga iyo saaxiibadaa ayaa kula joogi kara kadib baaritaanka.
- Waxa aad heli doontaa ogsijiin waqti gaaban marka aad soo kacdo.

- Haddii aad qaadato Coumadin, Plavix, ama daawo kale oo dhiiga khafiifisa, waydii dhakhtarkaaga goorta aad dib u bilaabi karto.
- Kalkaalisada ayaa ku siin doonta tilmaamaha isbitaal ka bixista oo qoraal ah kahor inta aadan bixin.

### **Goorma ayaan helayaa natiijooyinkayga?**

- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi doona waxa lagaa helay kahor inta aadan aadin guriga.
- Waxaad natiijooyinkaaga unugta la baaro ku heli doontaa boosto muddo labo ilaa saddex asbuuc ah.
- Waad wici kartaa xafiiska dhakhtarka haddii aad qabto wax su'aalo ama walaacyo ah.